**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOMALIYA**

ولاية بنت لاند الصومال

**GOLAHA WAKIILADA**

مجلس النواب

**Xafiiska Guddoomiyaha**
**Office of the Speaker**

***Ref:-*** **XGGW/DPL/ 57 /2013** **Garoowe, Arbaca** Date:-**24/07/2013**

**Ku:- Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

Ujeeddo:- **Ansixin Lifaaqa 3-aad ee Dastuurka**

**Guddoommiyaha Golaha Wakiilladdu:-**

MARKUU ARKAY:- Dastuurka DPL Qodobkiisa 64-aad

MARKUU ARKAY:- Soo jeedinta Xubno ka mid ah Guddiga Shuruucda in Dastuurka lagu darro Lifaaqa 3-aad.

MARKUU TIXGELIYEY:- Baahida loo qabo Doorasho ka dhacda Puntland January/2014.

MARKUU DHEGAYSTAY:- Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada.

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Lifaaqa 3-aad ee Dastuurka Dawladda Puntland**

**Allaa Mahad Leh**

**Cabdirashiid Maxamed Xirsi**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

PUNTLAND STATE

**LIFAAQA 3-AAD**

**Golaha Wakiillada Puntland** isagoo ka duulaya hakadkii galay Barnaamijkii Dimoqraadiyeynta sababo la xiriira arrimaha amniga, isla markaana qiimeeyey muddada ka hartay xilhaynta Golayaasha Dawladda ee hadda jira aanna laga gaari karin qabsoomida doorashooyin toos ah.

**Golaha Wakiillada Puntland** isagoo Cuskanayana Qodobada : 7-aad, 60-aad, 64-aad iyo 68-aad ee Dastuurka Puntland, wuxuu ku soo saaray Lifaaqa 3-aad ee Dastuurka:-

1. In la soo xulo Xubnihii Golaha Wakiillada ee bedeli lahaa Golaha hadda jira ka hor dhammaadka xilhayntooda oo ku eg **31/12/2013**.

2. Xubnaha Golaha Wakiiladu waxay ku imaanayaan hab-beeleedkii lagu soo xuli jiray Golaha Wakiillada mudadii ay Puntland jirtay.

3. Shuruudaha ka mid noqoshada Xubnaha Golaha Wakiillada ee la soo xulayo waa kuwa ku xusan Dastuurka Puntand **Qodobkiisa 61-aad.**

4. Golaha Wakiillada cusub ee ku xusan Qodobka 3-aad ee lifaaqan, waxay dooranayaan Madaxweynaha iyo Madaxweyne-ku xigeenka, waxay kaloo fulinayaan waajibaadka kale ee Dastuurku farayo.

5. Haddii xubin ama ka badan oo ka mid ah Golaha Wakiillada banneyso/banneeyaan xilkooda ka hor dhammaadka muddada xilhayntooda, waxaa soo bedeleysa beeshii soo xushay muddo 30 (soddon) maalmood gudahood ah, iyadoo la raacayo habka lagu soo xulay Xubnaha Golaha.

6. Barnaamijkii Dimoqraadiyeynta ee hakadku galay waxaa dib u bilaabaya Xukuumadda cusub ee loo doorto Hoggaanka Puntalnd January/2014.

7. Golayaasha deegaanka ee Dawladda Puntland waxaa lagu soo xulayaa hab la mid ah kan Baarlamaanka oo heer degmo ah, waxaana lagu dhaqayaa Qodobada Dastuurka ee khuseeya iyo xeerka Golayaasha deegaanka inta laga hirgelinayo doorashada Golayaasha deegaanka nidaamka axsaabta badan ee soo socda.

8. Waxaa si ku meelgaar loo laalay Qawaaniinta iyo xeerarka ka hor-imaanaya ama aan la socon Karin lifaaqan oo aysan suurtagal ahayn in hadda la fuliyo.

PUNTLAND STATE